

Cudurka Meningococcal iyo Tallaalka

Waa maxay Cudurka Meningococcal?

- Waa cudur ay keento bakteeriyo ay dad badani ku qaadaan dhuunta ama sanko iyagoon dareemin xanuun.
- Wuxuu ku faafaa xiriirka dhow ee toos ah. Tusaalooyinka waa dhunkashada, qufaca ama wadaagga waxyaabaha sida cuntada, cabitaanka, iyo qalabka muusiga.
- Dadku waxay bukoodaan marka bakteeriyadu gasho dhiigga iyo dareeraha kale ee jidhka.
- Tani waxay horseedi kartaa barar maskaxeed, dhaawac maskaxeed iyo mararka qaarkood dhimasho dhowr saacadood gudahood ah.

Maxaa ku jira tallaalka Meningococcal C-ACWY?

- Tallaalka Meningococcal waxa ku jira nooc fayraska ah oo dhintay, oo aan shaqaynayn. Tallaalku wuxuu jidhkaaga u diyaariyaa difaac (antibodies) ka difaaca cudurka.

Maaddooyinka tallaalka Meningococcal	Halkee kale ayaa laga heli karaa waxyaabahan?
Tetanus toxoid ¹ ama gawracatada toxoid ²	Tallaalada caruurnimada ee kale
Sodium chloride	Jidhka aadanaha, milix
Sodium phosphate ²	Daawooyinka caloosha jilciya
Trometamol ¹	Waxyaabaha la isku qurxiyo, daawooyinka
Sucrose	Sonkor

¹ Walaxda tallaalka Nimenrix®

² Walaxda tallaalka Menactra®

Talaalkani ma yahay badbaado?

- Haa, tallaalka Meningococcal C-ACWY ayaa lagu isticmaalayey rugaha tallaalka Caafimaadka Dadweynaha Ottawa ilaa 2007-dii.
- Kama qaadi kartid cudurka meningococcal dhanka tallaalka.

Sideen uga ilaalin karaa nafteyda Cudurka Meningococcal?

- Qaado tallaalka.
- Qiyaas Meningococcal C-ACWY ayaa lagula talinayaa dhammaan dhallinta da'doodu tahay 12 sano ama ka dib xitaa haddii ilmuhu horay u qaatay tallaalka Meningococcal C-ACWY.
- Ha wadaagin cuntada, cabitaannada, iyo maacuunta.
- Ha wadaagin lipstick ama cadayga.
- Ha wadaagin sigaarka.

Waa maxay dhibaatooyinka ka imaanaya tallaalka?

Ugu Caadisan	Caadi ahaan ka yar	Aad dhif u ah iyo Halis
Casaan, xanuun iyo/ama barar goobta, gaar ahaan xilliga 24 saac ee ugu horreeya	Muruq xanuun, Madax xanuun, dareen aan fiicnayn iyo/ama qandho yar	Falcelin-xasaasiyad daran oo keenta; dhibaato neefsasho, barar wejiga ama afka, cuncunyo
Daawaynta: Baraf mari aagga aad ka qaadatay tallaalka iyo/ama qaado acetaminophen (tusaale Tylenol®)		Kalkaaliyayaasha caafimaadka waxaa loo tababaray daaweynta falcelinta daran

Is barbar dhig khataraha – cudurka ama tallaalka?

Khatarta Cudurka	Khatarta Tallaalka
Maskaxda oo bararta (meningitis) taasoo keenta maqal la'aan, faalig ama qalal	Gacan xanuun: 6 ka mid ah 10 qof Madax-xanuun ama dareen daal: 6 ka mid ah 10kii qofba
Caabuqa dhiigga oo keena shoog iyo hawlgabka xubnaha Caabuqyada kale ee sambabada, kala goysyada, lafaha, wadnaha iyo maqaarka Dhimasho – 1 ka mid ah 10kii xaaladood oo daran	Dareen-celin halis ah ayaa aad dhif u ah

Waxaan horey u qaatay tallaalka meningococcal

- Waxaa laga yaabaa inaad hore u qaadatay tallaalka meningococcal (tusaale Men-C ama Menjugate®) xagga dhallaanka ka ilaaliya **hal** nooc oo bakteeriyada ah.
- Tallaalka Meningococcal C-ACWY wuxuu ka ilaaliyaa 80% ilaa 85% xagga dhallinta cudurada ay keento afar nooc oo bakteeriyada ah.

Waa inaad qaadatay hal qiyaas oo tallaalka ah si aad dugsiga u dhigato. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha tallaalka dugsiga, fadlan booqo [ParentingInOttawa.ca/immunization](https://www.ontario.ca/page/vaccines-children-school).

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo:

<https://www.ontario.ca/page/vaccines-children-school>

08/2025